

TALLAALKA COVID-19 EE LOOGU TALAGALAY DADKA DA'DOODU TAHAY 12-17



Tallaalka COVID-19 ee Pfizer-BioNTech ayaa hadda loo heli karaa qof kasta oo 12 jir ah ama ka weyn.

Tallaallada COVID-19 waa kuwo ammaan ah oo aad waxtar u leh. Dhammaan tallaallada COVID-19 waa inay maraan baaritaano adag iyo dib u eegis ka hor inta aan la adeegsan. Kadib markii lagu tijaabiyay in kabadan 2250 kaqeybgalayaal da' kooxeedkan ah, FDA waxay u fasaxday tallaalka Pfizer adeegsiga xaaladaha degdegga ah ee da'da 12 iyo wixii ka weyn mana helin wax walaac ah oo xagga amniga ah. Khubaro madaxbanaan ayaa xaqiijiyey in talaalku uu buuxiyo heerarka amniga iyo waxtarka sare.

Tallaallada COVID-19 waa lacag la'aan oo waa la heli karaa iyadoon loo eegin caymiska caafimaadka, muwaadinnimada, ama qaxootinimo. Bixiyahaagu kuguma soo dalaci karo kharashka booqasho xafiis haddii aad u gashay keliya inaad ka hesho tallaalka.

SIDEE Tallaal loo heli karaa



Raadi websaydh tallaal

- Fiiri **xulashooyinka tallaalka King County** (badankood uma baahna ballamo) kingcounty.gov/vaccine/somali
- **Wac xafiiska dhakhtarkaaga ama daryeel caafimaad bixiyahaaga** si aad u aragto haddii ay hayaan tallaal oo la heli karo.
- **Raadi farmashiyeyaal iyo goobo kale** adigoo adeegsanaya nambarka zipka vaccinelocator.doh.wa.gov (ka dooro luqadda geeska kore ee midigta menuga)
- **Caawimaad taleefan ma u baahan tahay?** Ka wac King County COVID-19 Call Center maalin kasta inta u dhexeysa 8 AM - 7 PM lanbarkan 206-477-3977. Turjubaano ayaa la heli karaa - sheeg luqadda aad u baahan tahay markii aad khadka soo gasho.



Maxaa loo keenayaa ballanta tallaalkaaga:

- **Dukumeenti lagu xaqiijiyo da'da:** Dukumiinti si loo xaqiijiyo da'da: gobolka, qabiilka, ama aqoonsiga ay soo saartay federaalka, shahaadada dhalashada, Aqoonsiga dugsiga ama iskuulka ama waraaqo caafimaad oo leh magac iyo taariikhda dhalashada ayaa la isticmaali karaa.
- **Oggolaanshaha tallaalka.** Waxaad ubaahan kartaa oggolaansho waalid ama qof kale oo qaangaar ah oo idman si aad uhesho tallaalka COVID-19. Waad isku oggolaan kartaa haddii madax banana tahay, ama aad guursato qof weyn, ama goobta tallaalku ay go'aamiso inaad tahay [qof qaan-gaar ah](#). (waa Ingiriis kaliya) Waxbadan ka baro shuruudaha oggolaanshaha ee kingcounty.gov/youthvaccine/somali
- **Xiro gacmo gaab** ama mid gacmo furan oo si fudud loo rogi karo.

SU'AALO MAAD QABTAA? Ka eeg FAQ bogga xiga ama booqo kingcounty.gov/covid/vaccine/somali.

SU'AALO INTA BADAN LA ISWEYDIYO OO KU SAABSAN TALLAALADA:

Immisa cirbad ayaan u baahan doonaa?

Waxaad u baahan doontaa laba cirbad oo tallaalka Pfizer ah. Waxaad heli doontaa cirbada labaad ugu yaraan 21 maalmood ka dib. Cirbada koowaad wuxuu bilaabayaa dhisida difaacaaga COVID-19 Tan labaadna weyneysaa oo wey dhameystirtaa ilaalintaas. Waxaa lagu tixgelinayaa inaad si buuxda isku tallaashay 2 toddobaad ka dib cirbadaada labaad.

Kani isla talaalka ay dadka waaweyn qaataan miyaa?

Haa, waa isla talaalka Pfizer ee dadka waaweyn ay qaataan. Dadka 18 iyo wixii ka weyn ayaa sidoo kale heli kara tallaalka Moderna ama Johnson & Johnson, laakiin tallaalkaas wali looma oggolaan da'da yar.

Ma yeelan doonaa waxyeelo?

Waxaa laga yaabaa inaad yeelato waxyeelo sida boog gacanta ah, qandho, madax xanuun, ama aad dareento daal dhowr maalmood ka dib tallaalka. Kuwani waa astaamo caadi ah oo muujinaya in nidaamka difaaca jirkaagu uu dhisayo difaac. Dadka qaarkiis ma helaan waxyeellooyin dhan.

Miyaan ka qaadi karaa COVID-19 tallaalka?

Maya. kuma jiro koronafayras tallaalka oo kama qaadi kartid COVID-19.

Maxaan sameyn karaa markaan si buuxda isku tallaalo?

Waxaad bilaabi kartaa inaad sameyso waxyaabo badan markale oo u istaagay faafida darteed! Waxaad guriga kula joogi kartaa dadka kale ee tallaalka buuxa leh adigoo maaskaro xiran (marka laga reebo dadka badan ama meelaha caamka ah). Uma baahnid inaad banaanka ku xirato maaskaro marka laga reebo meelaha gaarka ah ee dadka ku badan yihiin. La soco macluumaadka ugu dambeeya ee ku saabsan waxaad sameyn karto ka dib marka aad is tallaasho:

LifeAfterVaccine.org (waa Ingiriis kaliya)

Miyaan la socon karaa dadka aan la tallaalin anigii maaskaro aan qabin?

Ka dib marka aad si buuxda isku tallaasho, waxaad lajoogi guriga adiga oo aan maaskaro wadan dadka aan la tallaalin ee ka socda hal qoys haddii ay khatar hoose ugu jiraan COVID-19 (tusaale ahaan, midkoodna ma lahan xaalado caafimaad oo kale) Haddii ay jiraan dad ka badan hal guri ama qof kasta oo khatar sare ugu jira cudurka, waa inaad xirataa maaskaro, ugu yaraan idiin dhaxayso nasaaf dhan 6 fuudh, aadna joogtaa meel hawo fiican leh (sida banaanka ama daaqadaha oo furan). Tallaalku si fiican buu kuu ilaaliyaa, laakiin khubaradu weli waxay baranayaan in dadka la tallaalay ay u gudbin karaan fayraska dadka aan la tallaalin.

Xagee ayaan aadi karaa si aan uga jawaabo su'aalaha tallaalka ee khuseeyo aniga ama qoyskeyga?

Dhaqtarkaaga ama daryeel caafimaad bixiyahaaga had iyo jeer waa qof weyn oo aad weydiin karto. Waxa kale oo aad ka heli kartaa su'aalo badan oo lagaaga jawaabo

kingcounty.gov/covid/vaccine/somali.